



1. 15 daqiiqo kahor balantaada daawaynta taleefanka, guji linkiga laguugu soo diray iimeelka ama farriinta qoraalka ah.

- Linkiga ha la wadaagin cid kale. Keliya 1 qof ayaa isticmaali kara linkiga.
- Haddii cid kale u baahato inay ku soo biirto booqashada, u sheeg adeegbixiyaha marka booqashadu bilaabanto.



2. KidCare Anywhere wuxu ku furmi doonaa barawsarka internetka ee taleefankaaga.

- Waxa lagu talinayaa internet barawsarka Google Chrome.

3. Guji Continue (Sii Wad).




4. KidCare Anywhere wuxu tijaabin doonaa khadkaaga internetka, maykarafoonka, iyo kamarada ka hor inta aadan ku soo biirin booqashada.

- Guji Allow (u Oggoloo) KidCare Anywhere inuu isticmaalo maykarafoonkaaga iyo kamaradaada.




- Haddii kamarada shaqeynayso, waxaad iska dhex arkaysaa murayaadda inta tijaabadu socoto. Guji Proceed (Siiwad) marka tijaabada la dhammeeyo.



5. Waxa aad geli doontaa qaybta sugitaanka ee onlaynka ah. Bixiyuhu wuxu ku soo biiri doonaa booqashada markay akhriyaan macluumaadkaaga.

- Ha ka bixin ama ha soo laabin daaqadda KidCare Anywhere si aad u isticmaasho ablikayshano kale ama uga jawaabto wicitaan ama qoraal u qorto.



Tilmaamaha Soo Hadalka

• Kamarada iyo Maykarafoonka

- Xaqiiji in camer (kamaradaad) iyo microphone (maykarafoonkaagu) shidan yihiin. Guji badhanka si aad u shido oo aad u bakhtiiso.

- ON (DAAR)  
- OFF (DAMI)  

- Si aad u beddesho kamaradaada ama maykarafoonka.

1. Guji badhanka gayrka ee xaga hoose ee shaashada wakhtiga booqashada.




2. Isticmaal liiska hoos u baxa ee Kamarada iyo Maykarafoonka si aad u doorato waxa aad rabto inaad isticmaasho.



• Wada-sheekaysi

- Waxa aad u diri kartaa fariin sheekeysii bixiyahaaga wakhtiga booqashada.
- Guji badhanka Chat (Wada-sheekaysiga) si aad u furato wada sheekeysiga. Qor fariintaada oo guji Send (Dir).



•Dhammeystiraya booqashada

- Guji badhanka End Call (Dhammee Wicitaanka) Si aad usoo dhamayso.




- Haddii aad u baahato inaad dib ugu soo biirto booqashada ka dib marka aad dhammeyso wicitaanka, guji linkiga ku jira iimaylkaaga ama farriinta lagu soo dirqay oo isku day markale. Tani waxay kaliya shaqaysaa 5 daqiiqo gudaheed marka ay booqashadu dhamaato.


Cilad saarida

- Waxa i haysata mushkilad kamarada ama maykarafoonka ah.
 - Hubi in barawsarkaaga internetka idan u haysto inuu marin u helo maykarafoonkaaga iyo kamarada.


1. Fur Settings (Setingiska).




2. Hoos u deg oo guji Apps (Ablikayshanada) si aad u furto buuxinta app-ka.




3. Hel oo guji app (abka) barawsarka internetka aad isticmaasho.




4. Guji Permissions (Oggolaanshaha)




5. Muujintani waxay ku tusi doontaa waxa la oggolaaday iyo waxa la diiday.




- Hadii microphon (maykarafoonka) ama camera (kamarada) ay ku jiraan qaybta Denied, guji si aad u badasho buuxinta.



- Beddel setingiska si aad ugu ogolaato kamarada iyo maykarafoonka in la isticmaalo.



- **Ma heli karo linkiga booqshadeyda.**
 - Linkiga waxaa loo diray iimeelkaaga iyo taleefankaaga 3 jeer kahor wakhtiga booqashadaada.
 - Xilliga ballan qabsashada
 - 24 saacadood ka hor
 - 15 daqiiqo ka hor
- Linkiga hala wadaagin cid kale. Keliya 1 qof ayaa isticmaali kara linkiga. Haddii cid kale u baahato inay ku soo biirto booqashada, u sheeg adeegbixiyaha marka booqashadu bilaabanto.
- Ka raadi "Visitnow" fariintaada ama iimeelkaaga.
 - Waxaad ka eegtaa fooldharada Qashinka ama Farriimaha aan la Rabin.



Wixii taageero farsamo ah, la hadal (816) 302-7895

Si aad balan kale u qabsato, la hadal (816) 234-3700